NSW HEALTH

**Maajo 2007/May 2007** **SOMALI**
**SHP: (CDB) 07/098 (Som)**

# DAAWOOYINKA QAAXADA
## Macluumaadka loogu talagalay bukaanka
# TUBERCULOSIS MEDICATIONS
## Information for patients

Waxaad bilaabaysaa daaweyn uu dhakhtarku ku siinayo si loo daaweeyo curdurka (TB) . TB waa cudur daran oo waxyeelaya caafimaadkaaga haddii aad iska deyso oo aan la daaweyn. TB waxaa lagu baa'biin karaa daawaynta saxda ah.

**Kormeerid**

Waa muhiim inaad u qaadato daawada sida laguugu soo qorey. Daawo qaadasho aan caadi aheyn waxaa laga yaabaa inay kuu keento u adkeysasho daawo, taas oo ka dhigeysa cudurkaaga daaweyntiisa wax adag.

Si aad isaga ilaaliso dhibaatooyinkan waa in dhammaan daawada TB lala socdaa. Tan micnaheedu waxaa weeye waa in daawada lagu qaataa kalkaaliya caafimaadka hortiisa ama shaqaaleh kale oo caafimaad. Kalkaaliyayaasha rugta caafimaadka ee TB waxay awoodaan inay ka jawaabaan su'aalaha aad ka qabto daaweyntaada TB. Waxay awoodii doonaan inay la socdaan wixii waxyeela ah ee ay leedahay daawadu iyo haddii lagama maarmaan noqoto, waxay kuu balamin karaan inaad aragto dhakhtar.

Waa muhiim inaad sii wado qaadashada daawada, ilaa uu dhaktarka Rugtaada caafimaadka ee TB uu kuu sheego inaad joojiso (xitaa haddii aad fiicnaanto), si looga hortago inay soo noqoto TB

***Maxaan u baahanahay inaan sameeyo si aan u qaato daawadaan?***

- Si loo baabiiyo cudurka TB da;
- Si looga hortago koritaanka waxyaalaha ka soo hadha TB;
- Si looga hortago fiditaan dheeraad ah oo TB.

***Daawadee loo isticmaalaa daaweynta TB?***

Daawooyinka loo isticmaalo daaweynta TB badanaa waa antibiyootig la yiraahdo Isoniazid, Rifampicin, Pyrazinamide iyo Ethambutol. Waxaa laga yaabaa in laguu qoro maalin kasta ama 3 jeer toddobaadkii.

Daawooyinkan waa in loo qaataa sidii uu u qorey dhakhtarkaagu ugu yaraan lix bilood. Kiisas dhif ah daaweynt waxaa laga yaabaa inay u baahato inay socoto ilaa 2 sanno.

Fadlan hubi si aad ula socodsiiso kalkaaliyaasha caafimaadka inay ogaadaan haddii aadan dooneyn inaad timaado Rugta caafimaadka ee TB , ama hakuugu yimaado kalkaaliyuhu guriga, , (tusaale. Haddii aad leedahay ballan kale ) maalmaha daaweyntaada ama waxaan kuu sameyn kartaa wakhti kale

***Waa maxay sababtoo isticmaalayo intaas oo daawo ah oo kala duwan?***

Daawada TB  waa antibiyootig. Waxayna u shaqeeyaan siyaalo kala duwan si ay u dilaan bakteeriyada  TB .Bakteeriyada TB dhimashadeedu waa gaabisaa  waxaana loo baahan yahay daawooyin laysku daray ugu yaraan lix bilood si loo dilo bakteeriyadan.

Haddii daawada la isticmaalo mid walba markeeda, bakteriyada TB si dhakhsa ah ayey u noqon kartaa mid u adkeysata daawadaan.  Australia gudaheeda , dad tiradoodu aad u yar tahay ayaa qaba TB u adkeysata daawada loo isticmaalo in lagu daaweeyo TB. Haddii ay tani dhacdo antibiyootig dheeraad ah ayaa laga yaabaa in la isticmaalo daawadana waxaa laga yaabaa in la isticmaalo wakhti ka badan intaas.

***Waxyaalahaad ka taxadarayso markaad qaadaneyso daawada  TB***

Aalkolada iyo kiniiniga barsatemoolka waxaa laga yaabaa inay carqaladeeyaan daaweynta. Cabitaanka alkoholka  ama qaadashada barsatamool intaad qaadaneyso daawada TB waxay dhalin kartaa falcelino ama waxyeelooyin, laga yaabo inay waxyeeleeyaan caafimaadkaaga. Waxaa lagu talinayaa inaad iska ilaaliso aalkolada intaad daawada qaadaneyso.

Fadlan ogow in xilliga caadada oo aan ku iman wakhtigii caadiga ahaa ayaa laga yaabaa inay dhaco sidoo kale inta daaweyntu socoto.waxaa lagu talinayaa inay dumarku iska ilaaliyaan uurka intay daawada TB –da qaadanayaan. Saameynta kiniiniga uurka lagaga hortago waxaa waxtarkiisa yareeya Rifampicin, oo ka dhiga kiniiniga noocan ah oo kale ee uurka lagaga hortago waxaan leysku haleyn karin. Waxaa lagu talinayaa in dumarka qaadanaya daaweynta TB inay isticmaalaan hab kale oo bedel ahaan uurka ay iska ilaaliyaan. Waxaanad kala hadli kartaa dhakhtarkaaga nooca kale ee layskaga ilaalin karo uurka.

Haddii aad **UUR** yeelato ama aad **NAAS NUUJINEYSO** wargeli isla markiiba dhakhtarka rugta caafimaadka ee TB. Waxaa laga yaabaa in daawada aad qaadato la bedelo.

Baadhitaan dhiig oo joogta ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo in la sameeyo si loo jeegareeyo waxyeelada ay keeni karto daawadu. Dhakhtarkaaga ayaa baadhitaanadan kuu sameynaya.

***Isdhexgalka  daawooyinka***

Waa muhiim inaad ogeysiiso dhakhtarka TB haddii aad qaadaneyso daawooyin kale  ama aad isticmaaleyso daawada dabiiciga ah ee geedaha  si aan u qiimeyno waxyeelada suurtogalka ah ee ay daawooyinka kale ay ku leeyihiin daawada  TB.

Daawada asidhka loo qaato ee ay ku jirto  qaybaha aluminium  (tusaale. Gaviscon) waa inaan la qaadan laba saacadood gudahood markaad qaadato daawada TB . daaweynta Methadone ayaa sidoo kale laga yaabaa inay la falgasho daawada TB.  Daawooyinka qaarkood loo qaato diabetes, Parkinson’s disease, HIV, epilepsy ama cardiac conditions ayaa la falgeli kara daawada TB .  haddii aad qaadato daawo xaaladahan mid ka mid ah waa muhiim inaad u sheegto dhakhtarkaaga TB .

***Sida loo qaato daawada***

Daawadu waxay si wanaagsan u shaqeysaa haddii la qaato dhammaanteed HAL saac ka hor, ama LABA saac ka dib, cuntada waxaa la door bidayaa biyo inaad ku qaadato. Waxaa aad u wanaagsan inaad maalin walba isku wakhti qaadato daawada.

Bukaan socodka qaba yalaalugada, daawada waxaa lagu qaadan karaa cunto fudud ( tusaale, rooti qalan). Haddii ay ku qabato yalaalugo waa muhiim inaad u sheegto dhakhtarka ama kalkaaliyaha caafimaadka.

Haddii ay dhibaato kaa heysato xagga daawo qaadashada, fadlan kala hadal tan kalkaaliyaha ama dakhtarka TB.

***Waxyeelada daawada TB***

Siday tahay dhammaan daawadu oo kale ayaa ta loo isticmaalo in lagu daaweeyo TB laga yaabaa inay wakhti wakhti ku dhaliso waxyeelo dadka qaarkii. Haddii ay tani dhacdo, fadlan u sheeg tan dhakhtarka ama shaqaalaha kalkaaliyayaasha Rugta caafimaadka TB isla markiiba.

Haddii aad aragto wax astaamo ah aan caadi aheyn, amase aad dareento inaadan fiicneyn, fadlan kala hadal tan kalkaalisadaada caafimaadka ama dhakhtarka TB . haddii aad u baahato daaweyn degdega saacadaha shaqada ka dib, waxaad tagtaa Waaxda Gargaarka degdega ah ee isbitaalka kuugu dhow **adoo sida liiskaaga daawooyinka TB.**

***Waxyeelada suurto galka ah waxaa ka mid noqon kara laakiinse aan ku koobnayn:***

- Nabaro yar yar iyo cun cun
- yalaalugo (dareen xannuun), rabitaanka cuntada luma
- midabka maqaarka iyo indhaha oo noqda jaalle
- daal xad dhaaf ah
- indhaha oo ku cawirma, midabka araga indhaha oo waxgalaan
- caado aan wakhti caadi ah laheyn
- shuban
- xannuunka kala goysyada oo aan caaddi ahayn / gout
- xumad, madax xannuun iyo muruq xannuun
- maqaarka korkiisa oo ku diirma

ilmada oo midabkeedu noqdo mid hurdi ah, meesha wax laga arko oo jilcanaata, candhuuf kaadi ayaa badanaa timaada inta dadku ay daawad TB qaadabataab mana ah wax dareen dhalinaya.

**FADLAN HAKA WALAACIN INAAD KALA HADASHO DHINAC KASTA OO DAAWADAADA KA MID AH DHAKHTARKAAGA TB AMA KALKAALIYAHA RUGTA CAAFIMAADKA CAAFIMAADKA .**

**Tixraac:**


1. Therapeutic Guidelines, Antibiotic, Version 12, 2003
2. Department of Health, Controlling Tuberculosis in NSW 2005